# Codsigaaga magangelyo

## Warbixinta Guud ee dacwada magangelyodoonka

**Maxaa qoraalkan laguu siinayaa?**
Waxaad magangelyo ka weydiisatay Nederlaan. Magangelyo waa: badbaado waddan kale ay siiso dadka aan wadankooda badbaado ku qabin iyo aan wadankooda badbaado ka heleynin.

Haddii aad magangelyo weydiisato, waxaad dowlada Nederlaan si rasmi ah u weydiisaneysaa sharci deganaansho. Sharcigan waxaad ugu baahan tahay inaad ku noolaato Nederlaan. Codsigaaga magangelyada ayaa dacwada magangelyada uu ku bilaabanaayaa. Tani waa dacwad sharci ahaan oo ay dowlada Nederlaan ku go'aamineyso inaad sharci degenansho heleyso iyo in kale.

Waxaa qoraalkan ku qoran waxa la sameynaayo mudada dacwada magangelyodoonka socdo. Waxaad kaloo ka aqrineysaa waxa lagaa rabo (waajibaadyada) iyo waxa aad ka filan karto dowalada Nederlaan (xaquuqdaada).

# Ururadee ayaa la kulmeysaa?

**Xarunta Dhexe ee Dejinta Magangelyodoonka** (COA) ayaa dejinta iyo hagista u qaabilsan mudada dacwada magangelyodoonka ee magangelyodoonada Nederlaan. Waxaa kaloo ay COA u qaabilsan tahay inaad hesho cunto iyo ceymiska daryeelka caafimaadka. COA ayaa kaa caawin karta la xariirka dhaqtarka. COA waa urur madaxbanaan mana go'aamiyaan codsigaaga magangelyada.
www.coa.nl

**GezondheidsZorg Asielzoekers** (GZA) waa ururka aad aadeyso haddii aad jiran tahay ama su'aalo caafimaad aad qabto. Waxaa xerada COA dhexdeeda ama agagaarkeeda ku yaala xarunta caafimaadka GZA. GZA ayaa sameyneysa ballamada kalkaalisada dhaqtarka, kalkaalisada, caawiyaha dhaqtarka GGZ ama dhaqtarka qoyska.
www.gzasielzoekers.nl

**VluchtelingenWerk Nederland** (VWN) waa urur bani'aadannimada oo madaxbanaan oo loo sameeyey si ay danaha magangelyodoonka u ilaaliyaan. VWN warbixin iyo taageero shaqsi ahaan ah ayey ku siinayaan marka aad mareyso dacwada iyo wey kaa dhexdhexadinayaan marka ay dhibaato kala kulanto ururo kale. Iyo waxey si aad ah ula shaqeeyaan garyaqaankaaga. VWN kama go'aaminayaan codsigaaga magangeyada.
www.vluchtelingenwerk.nl
www.refugeehelp.nl

**Guddiga caawinaada Sharciga** (RvR) kuu sameynayaan inaad caawino ka hesho garyaqaan haddii aadan adiga iska bixin karin. Markaa RvR ayaa bixinaaya qarashka garyaqaankaaga caawinaada uu ku siinaayo. Garyaqaanka uma shaqeeyo RvR.
Garyaqaanka waa caawiyaha aarimaha sharciyada oo madax banaan kaana caawinaaya dacwada magangelyada.
www.rvr.org

**Immigratie- en Naturalisatiedienst** (IND)Waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. IND waxey baaraan haddii aad xaq u leedahay magangelyo Nederlaan ka hesho. Sidaa awgeed ayaa wadahadalada ula leedahay shaqaalaha su'aalo ku saabsan qofka aad tahay. Iyo sababta aad Nederlaan magangelyo uga weydiisatay. IND ayaa baareysa arrintaada shaqsiga iyo xaalada wadanka aad ka timid. Ka dib ayaa IND go'aamineysaa inaad (muddo) Nederlaan joogi karto iyo in kale.
www.ind.nl

Dhismayaasha IND iyo xeryaha COA waxa jooga shaqaalaha **sikuuritaga.** Waxaad ku aqoonsaneysaa labiskooda gaarka. Waxey u joogaan amaankaaga. Iyagana su'aalo ayaad weydiin kartaa ku saabsan waxa la oggol yahay iyo waxa aan la oggolayn xarumaha IND iyo COA. Shaqaalahan sikuuritaga wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyo.

**Waaxda dib u noqoshada iyo Bixitaanka** (DT&V) waa qeyb ka mid ah Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan iyo waxey mas'uul ka yihiin maamulka dib u noqoshada Nederlaan. Haddii codsigaaga magangelyada ay soo diido IND, waxaa DT&V kula yeelanaysaa wadahadal ku saabsan dib u noqoshada wadanka aad ka soo jeeda.
www.dienstterugkeerenvertrek.nl

**Ururka Caalamiga ee Muhaajiriinta** (IOM) waa urur madaxbanaan oo dunida oo dhan dadka muhaajiriinta ayey caawiyaan. IOM waxey kaa caawini karaan marka aad si isku filnaan aad Nederlaan rabto inaad uga baxdo. IOM waxey ku siinayaan warbixin ku saabsan dib u noqoshada iyo la qabsashada iyo hagista iyo abaabulka ka bixida Nederlaan. Waxaad si toos ah ula xariiri kartaa IOM, DT&V, VWN ama garyaqaanka si ay kuu caawiyaan.
www.iom-nederland.nl

Nidos waa sida ku qoran buuga Sharciga Bulshada ururka rasmiga ee fulineysa mas'uuliyada da'yarka magangelyodoonka ee keliga ah. Nidos ayaa maamuleysa horumarka iskufilnaanshaha dhalinta iyo wax ka qabaneysa haddii horumarka uu joogsado. Shaqaalaha NIDOS ayaa ku shaqo leh iyo waxey ilaalinaayaan danta dhaqsiga dhalinta ah ayey horumarinayaan iyagoo ixtiraamaaya dhaqanka asalka. Nidos waxey kaloo sameeyaan kor ka ilaalinta ilmaha magangelyodoonka ee dejin ka hela COA haddii aysan si wanaagsan u soconin barbaarinta reerka. Markaasi waxaa Nidos ay caawinayaan waalidka si loo hagaajiyo xaalada barbaarinta.
www.nidos.nl

**Dienst Justitiële Inrichtingen** (DJI) waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. Ma waxaa ku jirtaa xabsiga ajaanibta markaa waxaad joogeysaa dhismo xiran. DJI ayaa dhisamaha maamulaaya. Shaqaalaha -DJI waxey xirtaan labis u gaar ah. Iyaga ayaa ku daryeelaaaya iyo hagaaya mudada aad dhismaha xiran joogto.
www.dji.nl

## Maxaa adiga lagaa doonayaa?

Waxaa muhiim ah inaad mudada dacwada aad si waadix ah u sharaxdaa sababta aad magangelyo uga baahan tahay Nederlaan. Waxaa kaloo lagaa rabaa inaad dhamaan cadeymo kuwo aad heysato ama aad heli karto (sid dokumentiyada ama tusaale waraaqo arrintaada caawinaaya) aad tusto IND.

Waxaad marka wareysiga is dhiibitaanka la leedahay IND ku siineysaa qoraal qaabka dokumentiga aad u soo direyso. Ma heleysaa wareysiga dambe ka dib dokumentiyo muhiim u ah codsigaaga magangelyo? Waxaa qoraalka ku qoran qaabka aad IND u siin kartid.

Ma jiraa wax xaaladaada shaqsi ahaan ku saabsan oo IND loo baahan yahay ieny ku xisaabtamaan? Markaa waxaad u sheegi kartaa Ururka Qaxootiga caawiya (VWN) ama IND.
Markaa IND tallaabooyin ayey qaadi karaan, tusaale ahaan mudada wadahadalka ama xerada xagga CAO. Waxaa IND isku deyeysaa iney sida ugu wanaagsan iney kaaga taageeraan.

## Isu diyaarinta dacwada magangelyodoonka?

Mudada Nasashada iyo Is diyaarinta (RVT) waxaad degan tahay xerada dejinta ee COA.

Badiyaa waxaa mudada RVT heleysaa baaritaan caafimaad si loo xadido haddii aad sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso ka hadli karto. Waxaa kaloo mudada RVT heleysaa wacyi gelin ku saabsan dacwada magangelyodoonka (VWN). VWN ayaa ku hageysa iyo ku taageereysa mudada dacwada maganglyodoonka. Caawinaadani waa lacag la'aan. Ka hor bilowga dacwadaada magangelyo waxaad is baraneysaan garyaqaankaaga. Garyaqaankaaga wuxuu yaqaanaa sharciyada iyo nidaamka magangelyada. Iyo wuxuu kaa caawinaayaa u diyaargaroobida wareysiga dambe. Wadahadalkani IND oo aad ku sheegeyso sababta aad magangelyo u weydiisaneyso. Caawinaada garyaqaanka badiyaa waa lacag la'aan.

Hadii aad caruur heysato oo jira 15 ama ka weyn, iyagana wareysi dambe oo u gaar ah ayaa laga qaadayaa. Ma leedahay caruur 12-15 jir ah oo heysta sababo u gaar ah oo codsigooda magangelyada? Markaa iyagana wey heli karaan in wareysiga dambe oo iyaga u gaar ah la yeeshaan IND haddii ay iyaga rabaan. Tani waxaad u sheegi kartaa garyaqaankaaga.

## Dacwada magangelyodoonka maalin ilaa maalin

Maalinta aad ballanta la leedahay IND waxaad aadeysaa xafiiska IND. Halkan ayuu ka bilaabanayaa Dacwada Guud ee magangalyodoonka (AA). Wuxuu AA badiyaa socdaa 6 beri. Waxaa kaloo jira Dacwada Guud ee Magangelyada oo dheer: waa AA+ kaasoo badiyaa socda 9 beri. Waxaa AA+ waxaa loogu talo galay codsiyada magangelyada ee IND u maleyneyso inuu wareysiga dambe uu dheer yahay ama baaritaan dheeraad loo baahan yahay. Iyo magangelyodoonka u baahan fiiro dheeraad xagga maskax ahaan ama dhibaato jir ahaan qaba. RTV ka dib waxaa IND go'aamineysaa haddii aad AA ama AA+ aad aadeyso.

Mudada dacada magangelyodoonka waxaa suura gal ah inaad isla xeradii aad joogto aad joogtay markaad dacwada isu diyaarineysey. Mar mar waxaad u guurysaa RVT ka dib xero kale oo u dhow xafiiska-IND. Wadahadalada aa la leedahay IND waxaa lagu geynayaa xafiiska IND, ilaa haddii ay masaafada uu aad u yar yahay oo aad u lugeyn karto. Hoos ayaa ka aqrineysaa sida euu dacwadaada magangelyada maalin ilaa maalin sida uu u soconaayo.

*Dacwada Guud ee magangalyodoonka (AA)*

**Maalinta 1: wareysiga dambe**
Wareysiga dhibkaaga waxaa kula yeelanaaya shaqaale ka socda IND. Wareysigan waxaad si faahfaahsan u sheeganeysaa sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso. Waxaa iND ay mudada wareysiga ku weydiinayaan su'aalo. Haddii aad rabto, VWN ayaa weydiin karta iney kula joogaan marka aad leedahay wareysiga dambe. Tani waxaa kuu abaabuli kara garyaqaankaaga.

Waxaa kaloo wareysiga dambe jooga tarjumaan. Waxaa IND su'aalaha kugu weydiineysaa luqada Nederlaanka. Tarjumaanka ayaa ku tarjumaaya luqada adiga aad fahmeyso. Tarjumaanka ayaa jawaabtaadana u tarjumaaya luqada Nederlaanka. Tarjumaanka waa madax banaan yahay, uma shaqeeyo IND oo wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyada. Muhiim: isla markii sheeg haddii aad adiga iyo tarjumaanka aad si fiican isu fahmeynin. Markaa IND tarjumaan kale ayey kuu abaabulaayaan. Waa muhiim inaan wax is afgaran waa aysan abuurmin adigoo su'aasha si fiican u fahmin darteeda. Shaqaalaha IND waxey ka sameynayaan qoraal wareysiga dambe. Ma weydiisateen adiga iyo lamaanahaaga(guurka isku qabtaan) codsi magangelyo? Markaa labadiina si kala gaar ah ayaa shaqaale IND idiin wareysanayaa.

Waxaa muhiim ah inaad sheegto wax walba oo cadeynaayo inaad magangelyo u baahan tahay. U sheeg si daacad ah, buuxda iyo waadix ah waxa kugu dhacay iyo sababta aad wadanka aad ka soo jeedo badbaado uga heleynin. Haddii aad dhacdo gaar ah sida ay ahayd aadan u xasuusanin, sidaa ugu sheeg IND. Shaqaalaha-IND wey la socdaan xaalada guud ee wadankaaga. Waxaa muhiim ah inaad u sheegto adiga xaaladaada: maxaad adiga ugu baahan tahay badbaado shaqsiyadaada ah? U sheeg inta ugu badan ee faahfaahibta muhiimka ah. Ma leedahay calaamado, xanuuno jirka ama maskaxda ah oo ku saabsan sababta aad magangelyada u weydiisaneyso? Markaa waa muhiim inaad taasi IND u sheegtaa. Waxaa IND ka go'aamin kartaa iney kuu diraan baaritaan caafimaad haddii ay IND muhiim u tahay go'aanka codsigaaga. Adigana baaritaankan iskaaga waad u sameyn kartaa qarashka adigoo iska bixinaaya. Sidoo kale wareysigan waxaa jooga tarjumaan. Waxay kuu siinayaan IND qoraalka wareysiga dambe ama garyaqaankaaga ayaa ku siinaaya.

**Maalinta 2: aqriska wareysiga dambe**
Garyaqaankaaga ayaa kuu aqrinaaya qoraalka wareysiga dambe. Sidoo kale wadahadalkana waxaa jooga tarjumaan wada tarjumaaya dhamaan wixii adiga iyo garyaqaanka ka wada hadleysiin. Sidoo kale wadahadalkana waxaa jooga tarjumaan wada tarjumaaya dhamaan wixii adiga iyo garyaqaanka ka wada hadleysiin.

**Maalinta 3: go'aanka koowaad**
Waxay IND go'aamineysaa inaad ka soo baxeysid sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxa ka soo baxa go'aankan ayaa xadidaaya sida uu dacwadaada magangelyada u soconaayo. Waxaa suura gal ah 3 arrimood:

1. Waxaa ka soo baxeysaa sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqada IND (= go'aanka) kaasoo ku qoran in codsigaaga la ogolaaday. Waxaad laguu oggol yahay inaad (muddo) Nederlaan ku noolaato. Garyaqaankaaga ayaa kuu sharaxaaya sida ay tani kuu saameyneyso.
2. Iney IND muddo dheeraad oo baaritaan ku sameeyaan oo ma suuroobeyso in 6 beri gudahooda (ama 9 marka AA+) uga go'aamiyaan codsigaaga magangelyo. IND waxey codsigaaga magangelyada uga shaqeyneysaa Codsiga Magangelyada la

Dheereeyey (VA). Go'aanka codsigaaga magangelyada ka dib ayaa la gaarayaa. Waxaa lagu siinayaa qoraal kale oo warbixin ah oo ku saabsan Codsiga Magangelyada la Dheereeyey.
3. Waxay IND go'aamisey inaadan ka soo baxeynin sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqada IND kaasoo ku qoran iney damacsan yihiin iney codsigaaga magangelyo soo diidaan. Qoraalkan waxaa loo yaqaan waxa la damacsan yahay (voornemen). Warqadan waxaa kaloo ku qoran sababaha diidmadan iyo wixii saameyn ay taasi kugu yeelaneyso. Garyaqaankaaga ayaa warqadan kala hadleysaa.

**Maalinta 4: jawaabta go'aanka: waxa loogu jawaabay**
Waxaa IND damacsan tahay iney codsigaaga magangalyodoonka ay soo diidaan markaa waxaa taasi kala hadleysaa garyaqaankaaga. Garyaqaankaaga ayaa IND ka dib u diraaya qoraalka jawaabta. Tani waa warqad oo aad si rasmi ah ugaga jawaabeyso waxa ay damacsan yihiin IND. Warqadan ayaa ku sheegi kartaa sababta aad ugu raacsanayn waxa ay damacsan yihiin.

**Maalinta 5 iyo 6: go'aanka**
Marka la aqriyo warqada jawaabta waxaa IND go'aamineysaa in waxa la damacsan yahay wax laga bedalaayo. Waxa ka soo baxa go'aankan ayaa xadidaaya sida uu dacwadaada magangelyada u soconaayo. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqad ka socda IND ku qoran natiijada go'aanka. Garyaqaankaaga ayaa kuu sharaxaaya sida ay tani kuu saameyneyso. Waxaa suura gal ah 3 arrimood:
1. Waxaa ka soo baxeysaa sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaad heleysaa (garyaqaanka xagiisa) warqada IND (= go'aanka) oo ku qoran in codsigaaga magangelyo la ogolaaday. Waxaad laguu oggol yahay inaad (muddo) Nederlaan ku noolaato. Garyaqaankaaga ayaa kuu sharaxaaya sida ay tani kuu saameyneyso.
2. Iney IND muddo dheeraad oo baaritaan ku sameeyaan oo ma suuroobeyso in 6 beri gudahooda (ama 9 marka AA+) uga go'aamiyaan codsigaaga magangelyo. IND waxey codsigaaga magangelyada uga shaqeyneysaa VA. Waxaa lagu siinayaa qoraal kale oo warbixin ah oo ku saabsan Codsiga Magangelyada la Dheereeyey.
3. Waxay IND waxey weli la tahay inaadan ka soo baxeynin sharuudaha sharciga deganaanshaha magangelyada. Waxaa heleysaa (garyaqaankaaga xagiisa) warqada IND (= go'aanka) kaasoo ku qoran in codsigaaga la soo diiday. Waxaa go'aanka ku qoran sababaha diidmada iyo saameynta ay kugu yeelaneyso. Tusaale ahaan laguuma oggola inaad sii joogto Nederlaan oo waa inaad wadankaaga ku noqotaa. Waxaa kaloo ku qoran waxa aad sameyn karto haddii aadan ku raacsanayn diidmada. Iyo wixii aad sameyn karto si aad wadankaaga ugu noqoto. Garyaqaankaaga ayaa kaala hadlaaya go'aankan.

Dacwada guud ee qaxootinimada 9 beri (AA+)

IND dacwadaada magangelyada ma uga shaqeyneysaa habka AA+? Markaa wuxuu dacwadaada magangelyada badiyaa soconayaa 9 beri:
• Maalinta 1 iyo 2: wareysiga dambe;
• Maalinta 3 iyo 4: aqriska wareysiga dambe ee xagga garyaqaanka;
• Maalinta 5: go'aanka koowaad;
• Maalinta 6 iyo7: jawaabta go'aanka: waxa loogu jawaabay ee garyaqaanka u qoray;
• Maalinta 8 iyo 9: go'aanka labaad.

## Dib uga noqashada codsigaaga

Waa kuu banaan tahay inaad codsigaaga mar walba oo aad jeceshahay ka soo noqoto. Hadey xaalada sidaa tahay waxaa fiican inaad la xariirto garyaqaanka ama IND. Ma ka soo noqoneysaa codsigaaga ee IND? Markaa Nederlaan ma sii joogi kartid. Ilaa haddii aad sabab kale laguugu ogol yahay inaad ku joogto. Markaa xaq kale uma lihid xerada. Ma ka soo noqoneysaa codsigaaga magangelyo? Waxaa lagu siin karaa mamnuucid safar soo gelitaanka. Sidaa awgeed laguuma oggola inaad ku safarto muddo Yurubta Midowday (EU), Noorway, Ijsland, Lichtenstein iyo Swiiska. Marka aad codsigaaga magangelyo kasoo noqoto ka dib, dib magangelyo waad u weydiisan kartaa. Xitaa haddii lagu siiyey mamnuucud safar gelitaan.

## Dacwada magangalyodoonka ka dib

Ka dib AA ama AA+ waxaad u guureysaa xero kale oo COA.

**Waxaad heshay sharci deganaansho**
IND ma go'aamisay inuu codsigaaga magangelyo la ogolaaday, markaa (ilaa muddo) waad ku noolaan kartaa Nederlaan. Waxaa lagu siinayaa sharci deganaansho, waad shaqeyn kartaa iyo reerkaagana waad keeni kartaa. Intaa waxaa dheer COA ayaa kaa caawinaaya guri raadinta. Wadahadalka COA waxaa lagaa qorayaa warbixinta muhiimka ah ee gurigaaga ku saabsan. Iyadoo taa la fiirinaayo ayaa waxaa lagugu xerayaa degmo. Degmadaasi ayaa kuu raadinaaya guri kugu habboon. Degmadaasi waxey keliya kuu bandhigeysaa 1 mar keliya guri waana inaad ogolaataa. Ilaa aad guri kuu gaar ah ka heleyso, waad deganaan kartaa xerada dejinat ee COA. IND ayaa kaa wargelin doonta xaquuqdaada iyo waajibaadkaaga ka dib marka codisgaaga magangelyo la ogolaado. Shaqaalaha VWN ayaa kaa caawin kara la qabsashada bulshada Nederlaan. Iyaga ayaa kaa caawin doona sidaa u heli lahayd ururada kala duwan. Iyo waxey kaa hagi karaan u guuritaanka degmada iyo helitaanka waxbarasho ama shaqo. Caawiyaha dhalinta waxaa kaloo ay kaa caawin kartaa mideynta reerka.

**Adiga ma helin sharci deganaansho**
Haddii IND ay codsigaaga magangelyada soo diido, markaa waxaad kala hadleysaa garyaqaankaaga si aad uga dacwootaan go'aankan xagga xaakinka Nederlaan. Taasi waxey micnaheeda tahay in aad si rasmi ah xaakinka u ogeysiineysid inaadan ku raacsanayn go'aanka IND. Dacwadaasi go'aankeeda badiyaa Nederlaan waad ku sugi kartaa. Haddii aan laguu oggolayn xaakinka waa weydiin kartaa inaad mudada dacwada socoto Nederlaan ku sii sugto. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawinaaya. Xaakinka wuxuu baarayaa ka dib in IND ku dhaqantay sharciga Nederlaan u degsan marka ay go'aanka gaarayeen ee codsigaaga magangelyo.

Haddii IND codsigaaga magangelyo ay soo diido, waxaa lagu geynayaa xero qaxooti kale. Waxaad badiyaa heysataa 28 beri waqti ah si aad ka bixitaankaaga Nederlaan u abaabusho. Marka uu dhamaado waqtigaasi wax xaq ah uma lihid xerada. Laguuma oggola inaad xerada qaxootiga sii deganaato. Xitaa dacwada magangelyodoonka ka dib waad la xariiri kartaa VWN si ay kaaga caawiyaan warbixin.

**Dib u noqosho**
Adiga ayaa mas'uul ka ah ku noqoshada wadnka aad ka soo jeedo. Waaxda Dib u noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V) ayaa kaa caawinaaya diyaarinta bixitaankaaga. Sidaa awgeed DT&V ayaa kula soo xariiraaya marka diidmada codsiga magangelyada ka dib. Haddii aad mudada laguu sheegay gudaheeda iskaaga u bixi weydo, waxay DT&V qaadayaan tallaabooyin si laguugu qasbo inaad Nederlaan ka baxdo.

Ma rabtaa ka hor inaa DT&V dib u noqosho kala hadasho? Markaa garyaqaankaaga ama VWN ayaa kula xariirinaaya DT&V. Adigana iskaaga waad la xariir kartaa DT&V adigoo u diraaya e-mailka ilc@dtv.minvenj.nl

Haddii aad si iqtiyaari ah ugu noqoneyso wadankaaga, waxaad la xariiri kartaa DT&V ama Ururka Caalamiga Internationale Organisatie voor Migratie (IOM) Websaaytkooda ayey ku qoran qaabka. Waxaad kaloo ka aqrineysaa warbixinta dib u noqoshada iyo caawinaadee (qarashka asaasiga caawinaada iyo/ama caawinaada dib ula qabsashada)ee suura galka ah inaad heleyso. Iyaga ayaa warbixinta guud ku siinayaa iyo kaa caawineysaa bixitaankaaga. Waxaad ka aadi kartaa xerada aad ku jirto ee COA xagga IOM. Waxaad kaloo weydiin kartaa wixii ku saabsan dib u noqoshada iyo caawinaada VWN ama ururada kale.

## Keydinta xogta gaarka ah

Xogta gaarka ah waa dhamaan warbixin adiga kugu saabsan. Ururada la shaqeeyey qoritaanka qoraalkan hoos ayey ku qoran yihiin. Ururadaan wey isticmaalaan xogta shaqsiga mudada codsigaaga laga shaqeynaayo, soo gudbinta ama su'aasha. Waxey ku weydiinayaan warbixintaada iyo ururada kale ama dadka kale hadii loo baahdo. Ururadaan waxey isticmaalaan iyo keydiyaan warbixintaada iyo waxey u sii gudbiyaan ururo kale haddii taasi sharci ahaan qasab tahay. Sharciga xogta shaqsiga waxaa ku qoran waajibaad saaran ururada warbixinta isticmaala. Waa iney si sax ah iyo amaan ah warbixintaada ku sameeyaan. Sharciga xogta shaqsiga waxaa kaloo ku qoran xaquuqdaada. Haddii aad weydiisato, waxaad leedahay tusaale ahaan xaquuqda soo socda:
- inaad aragto warbixintaada ururada haaya;
- ogaato waxa ay ururada ku sameynayaan warbixintaada iyo sababta;
- ogaato ururadee warbixintaada loo gudbiyey.

Ma rabtaa inaad wax dheeraad ka ogaato isticmaalka xogtaada shaqsiga iyo xaquuqdaada? Markaa fiiri websaaytyada ururadaasi.

## Codsigaaga magangelyo iyo xabsiga ajaanibta

Ma laguu ogolaanin inaad joogto Nederlaan adigana iskaaga ugama baxeysid Nederlaan? Markaa xabsiga ajaanibta ayaa lagu geyn karaa. Xabsiga ajaanibta waxay micnaheeda tahay joogis dhismo xeran (xabsi). Waxaa ulajeedada yahay in dadka aan Nederlaan loo oglaanin iney joogaan ay meesha lagu haayo si ay diyaar u yihiin marka qasab lagu saaraayo.

Ma ku jirtaa xabsiga aaanibta oo ma weydiisatay magangelyo? Ama ma weydiisatay magangelyo ka dibna ma waxaa lagu geeyey xabsiga ajaanibta? Markaa waxaa codsigaaga magangelyo lagu fiirinaayaa Xarunta Cadaalada Schiphol (JCS). Markaa waa iney IND muddo lix wiig ah go'aan ka gaartaa codsigaaga.

Waxaa badiyaa lagu geynayaa dhismaha JCS. Laakiin waxaa kaloo suura gal ah inaad joogto mesha aad hadda joogto. Ma aadeysaa JCS iyo ma markii ugu horeysey aad magangelyo weydiisataa? Markaa iND, markaad imaado ka dib, mar mar ayey foom su'aalo u buuxineysaa ama kambiyuutarka. Foomkan waxaa loo yaqaan foomka isqorida. IND ayaa xadideyso haddii aan foomka isqorida lagu shaqeyneynin, tusaale maadaama ay mashquul yihiin.

Wadahadalka koowaad aad la yeelato IND, waxaa lagu magacaabaa wareysiga is dhiibida. Tani waa wadahadal muhiim ah oo IND su'aalo ku weydiinayaan. Waxey IND mudada wadahadalkan rabaan iney warbixin ka helaan qofka aad tahay iyo meesha aad ka timid. Iyo safarkaaga iyo sababta aad Nedrlaan u joogto. Waxaa su'aalo lagaa weydiinayaa:

- shaqsiyadaada, jinsiyadaada, asalkaaga, degaankaaga iyo agagaarka degaankaaga;
- familkaaga;
- dokumentiyada;
- waxbarashada;
- shaqada iyo waajibka milatariga;
- deganaan wadamo kale;
- safarkaaga Nederlaan;
- iyadoo kooban sababta aad magangelyada u weydiisaneyso.

Ahoow daacad iyo bixi mar walba warbixinta runta ah. Ha isticmaalin warbixin ku qoran dokumeti faalso ah ee (safarka). Una sheeg haddii aad magac kale (=magac kaaga ahayn) aad soo istcmaashay. Haddii aad warbixin qalad ah ama aan buuxin aad IND siiso taasi waxey dhib u keeni kartaa go'aanka codsigaaga magangelyo.

IND waxey ka sameynayaan qoraal wareysiga dambe. Adiga waxaad koobi ka heleysaa xagga garyaqaankaaga. Waxaa yeelaneysaa garyaqaan kaa caawiya diyaarinta Dacwada Guud ee Magangelyada. Adigana iskaaga garyaqaan waad u raadsan kartaa. Garyaqaankaaga wuxuu yaqaanaa sharciyada iyo nidaamka magangelyada. Iyo ogoow muhiimada wareysiga dambe leeyahay. Tani waa wadahadalka aad IND ugu sheegeyso sababta aad magangelyada u weydiisaneyso. Badiyaa looma baahna inaad garyaqaanka adiga bixiso. Taasi waxaa kuu sameynaaya Guddiga Sharciyada ka caawiya (Raad voor Rechtsbijstand).

Dacwada Guud ee Magangelyodoonka (AA ama AA+) ee xabsiga ajaanibta waa isla mid mida magangelyodoonkaaan xabsiga ajaanibta ku jirin. Ka aqri qoraalkan korkiisa sida uu AA ama AA+ maalin ilaa maalin u socdo.

**Dacwada magangelyodoonka la fududeeyey**

Ma ka timid wadan amaan ah, ma tahay shicib-EU ama ma heysataa badbaado caalami ah? Markaa rajada wey weyn tahay inaadan magangelyo helin. Waxaa IND uga shaqeyneysaa codsigaaga qaab la fududeeyey iyo dacwada deg dega ah. Mudada dacwadan waxaa keliya INDkula yeelaneysaa 1 wareysi. Taasi sidoo kale waa la mid haddii aad sharci deganaansho magangelyo heysato oo Nederlaan, waddan kale oo Yurub-ka tirsan, Noorwey, Ijsland Liechtenstein ama Swiiska. IND waxey ka go'aamineysaa waxa aad sheegtay sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso. Iyo

waxey go'aaminayaan haddii aad sharci magangelyo heleysid iyo in kale. Ka aqri warbixinta qoraalka ee dacwada la fududeeyey.

*Liiska wadamada amaanka*
Albaniya, Armeniya, Bosnië-Herzegovina, Braziliya, Georgiya, Ghana, Hindiya, Jamaica, Kosovo, Marooko, Mongoliya, Montenegro, Noord-Macedonië, Sinegaal, Serviya, Trinidad en Tobago, Tunesië, Mareykanka.

Liiskan wuu isbedeli karaa: wadamo ayaa ku darsami kara ama ka bixi kara. Waxey taasi ku xiran tahay amaanka wadanka. Liiska ugu dambeeya ee wadamada amaanka waxaa ay ku qoran tahay websaaytka Dowlada:www.rijksoverheid.nl

**Dacwada magangalyodoonka ka dib**
Ma soo diiday IND codsigaaga magangelyodoonka? Markaa waxaad kala hadleysaa garyaqaankaaga si aad uga dacwootaan go'aankan xagga xaakinka Nederlaan. Taasi waxey micnaheeda tahay in aad si rasmi ah xaakinka u ogeysiineysid inaadan ku raacsanayn go'aanka IND.
Waxaad kaloo xaakinka weydiin kartaa inaad mudada dacwada socoto Nederlaan ku sii sugto. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawinaaya.

Xaakinka wuxuu baarayaa ka dib in IND ku dhaqantay sharciga Nederlaan u degsan marka ay go'aanka gaarayeen ee codsigaaga magangelyo. Go'aanka xaakinka xaaladaha badankooda waa laguu oggol yahay inaad Nederlaan ku sugto. Markaa waxaad joogeysaa meel xiran.

**Dib u noqosho**
Haddii aad Nederlaan laguu oggolaan inaad joogto, adiga ayaa ka mas'uul ah ka bixitaankaaga Nederlaan.
Waaxda Dib u noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V) ayaa kaa caawinaaya diyaarinta bixitaankaaga. Sidaa awgeed DT&V ayaa kula soo xariiraaya marka diidmada codsiga magangelyada ka dib. Haddii aad mudada laguu sheegay gudaheeda iskaaga u bixi weydo, waxay DT&V qaadayaan tallaabooyin si laguugu qasbo inaad Nederlaan ka baxdo. Ma rabtaa ka hor inaa DT&V dib u noqosho kala hadasho? Markaa garyaqaankaaga ama VWN ayaa kula xariirin kara DT&V. Adigana iskaaga waad la xariir kartaa DT&V adigoo u diraaya e-mailka ilc@dtv.minvenj.nl

Haddii aad si iqtiyaari ah ugu noqoneyso wadankaaga, waxaad la xariiri kartaa DT&V ama Ururka Caalamiga Internationale Organisatie voor Migratie (IOM). Websaaytkooda ayey ku qoran qaabka. Waxaad kaloo ka aqrineysaa warbixinta dib u noqoshada iyo caawinaadee (qarashka asaasiga caawinaada iyo/ama caawinaada dib ula qabsashada)ee suura galka ah inaad heleyso. Iyaga ayaa warbixinta guud ku siinayaa iyo kaa caawineysaa bixitaankaaga. Badiyaa xarunta xabsiga ayaa u tegi kartaa IOM. Waxaad kaloo weydiin kartaa wixii ku saabsan dib u noqoshada iyo caawinaada VWN.

## Su'aalaha marar badan la weydiiyo

**Warbixinta Guud ee dacwada magangelyodoonka?**
Ka dib markaad magangelyodoon ahaan iska sheegto bolisska waxaad sugeysaa wareysigaaga kowaad ee IND. Taasi waxa lagu magacaabaa wareysiga isdhiibitaanka. Ka dib waxaad heysataa waqti 6 beri ahoo aad isugu diyaariso dacwadaada

magangelyada (AA ama AA+). Caadi ahaan waqti ka dheer ayey qaadataa ilaa uu ka bilaabmaayo dacwadaada magangelyodoonka. Xaaladaha qaarkood ma heleysid waqtiga isdiyaarinta. Xerada dejinta ee COA waxaad heleysaa warqad ay IND kugu casumeyso wareysiga dambe.

**Muddo immisa ayaan sugayaa go'aanka IND?**
Dacwada guud ee magangelyada wuxuu badiyaa socdaa 6 (AA) ama 9 (AA+) maamaha shaqada. Mar mar IND mudadaasi dhexdeeda kuma go'aamin karto, tusaale ahaan maadaama adiga aad xanuunsada mudadii dacwada magangelyada. Xaaladaa oo kale waa ay dheereyn kartaa IND 6 dheeraad ah ama ka badan oo maalmaha shaqada. Xafiisyada-IND badiyaa sabtida iyo axada wey xiran yihiin: kuwani ma aha maalmaha shaqada. Waxaa kaloo IND go'aamin kartaa iney codsigaaga magangelyada uga shaqeyneyso Codsiga Magangelyada la Dheereeyey. Waxaad markaa lagu siinaayaa qoraal kale oo warbixin dheeraad ku qoran ku saabsan Dacwada Magangelyada la Dheereeyey. Sharciga ayey ku qoran tahay meeqa bilood gudahooda IND ay go'aamiyaan laga bilaabo taariikhda codsigaaga magangelyodoonka. Tani waa waqti go'aamin sharciyeysan. Ka aqri mudada go'aaminta sharciyeysaa [www.ind.nl/beslistermijnen](http://www.ind.nl/beslistermijnen) ama [www.ind.nl/en/decision-periods](http://www.ind.nl/en/decision-periods). Mudada go'aaminta mar mar waa la dheereyn karaa. Laakiin IND lama oggola iney wax ka badan 21 bilood iney gaarsiiso go'aan gaarida.

Ma soo dirin IND mudada go'aanka loogu talo galay go'aan? Markaa waxaad IND qoraal ahaan u weydiin kartaa iney IND sida ugu dhaqsaha badan uga soo jawaabaan. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawin kara.

**Waxaan arrinteyda magangelyodoonka u sheegan karaa nin ama naag. Ma suuro galbaa?**
Haa, taasi waxaad ku sheegeysaa wareysiga hore(=wadahadalka IND). Waxaa IND isku deyeysaa in shaqaale nin ama naag ah iyo tarjumaan nin ama naag ah oo wareysiga dambe ah.

**Maxaa sameeyaa haddii aan jiranahay ama uur leeyahay?**
Haddii aad jiran tahay ama uur leedahay, u sheeg kalkaalisada mudada baaritaanka talada caafimaadka (fiiri qoraalka: Ka hor intaadan dacwada magangelyada kuu bilaabanin). Tani aad ayey muhiim u tahay haddii aad xanuun leys qaadsiiyo leedahay, ama aad u maleyso inaad qabto, sida: qaaxada ama tiibiiga, isnidaamis/cuncun ama cagaarshow B. Wax walba oo aad u sheegto kalkaalisada, waxaa loo xafidayaa kalsooni. Kalkaalisada warbxintaada caafimaadka marna uma gudbiyaan dad kale adigoon fasax lagaa qaadin. Haddii aad mudada codsigaaga magangelyo xanuunsato, markaa u sheeg shaqaalaha COA, IND ama VWN. Iyaga ayaa ku caawin kara si aad u hesho caawinaada (caafimaad). Ma jiran tahay maalinta aad wadahadalka la leedahay IND ama garyaqaankaaga? Weydii markaa COA iney taasi u gudbiyaan IND ama garyaqaankaaga.

**Ma qabtaa su'aalo ka dib markaad qoraalka aqrisey?**
Waxaad su'aalahan weydiin kartaa garyaqaankaaga ama shaqaalaha COA, IND ama VWN.

**Ma qabtaa ashtako?**
Dhamaan ururada ku shaqada leh dacwada magangelyada, waxey u shaqeeyaan si shaqaalenimo iyo sax ah. Ma kula tahay in si aan wanaagsaneyn kuula dhaqmay urur? Markaa ashtako ayaa gudbin kartaa. Garyaqaankaaga ayaa taasi kaa caawin kara.

Qoraalka waxaa si wadajir ah u soo saaray:
Qeybta Boliiska Ajaanibta, Aqoonsiga iyo Ka ganacsiga Dadka (AVIM)
Nidos
Xarunta Dejinta magangelyodoonka
Centraal Orgaan opvang asielzoekers (COA)
Adeega-Imigrashanka iyo Jinsiyada (IND)
Ciidanka Ilaaliya xaduudka (Kmar)
Guddiga taageerida Sharciyada (RvR)
Urur qaxootiga Caawiya Nederlaan (VWN)
Ururka Muhaajiriinta Caawiya (IOM)
Waaxda Dib u Noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V)

Oo ay soo dalbeen:
Wasaaradda Cadaalada iyo Amaanka, maamulaha maamulka Imigrashanka
www.rijksoverheid.nl

Qoraalkan waxa ku qoran wax xaquuq ah kama soo saari kartid. Haddii tarjumaada ay dhaliso fahmid qalad ah, markaa mida Nederlaanka ayaa la raacayaa.